BMB
Bundesministerium
für Bildung

# Ku soo dhawow nidaamka dugsiga Austria!

Somali

Welcome to the Au
Bienvenue à l’école
Bine ați venit la șco
المدرسة النمساوية!
Добро пожаловать в авс
Willkommen in der österre
Добре дошли в австри
Avusturya okuluna
Ku soo dhawow nidaamka
اتریش خوش آمدید
Mirë se vini në shko
Марша дог1 ийла шу ав

# Waaladiinta Qaaliga,
# Masuulada qaaliga ah,

Waxaad joogtaa Austria muddo gaaban. Waxyaabo badan oo nolosha ah halkaan way kugu cusubyihiin - oo ay ku jiraan nidaamka dugsiga Austrian. Sidaas darteed Wasiirka Waxbarashada wuxuu jeclaan lahaa in uu kula wadaago qaar kamid ah warbixin muhiim ah oo ku saabsan dugsi ka aadista Austria. Shaqaalaha barida ee dugsiga canugaaga waxay ku farxayaan in ay ka jawaabaan su'aalahaaga iyo waxay kugula talin karaan sida layska rabo.

## 1 Canugayga ma loo ogolyahay in uu dugsiga aado?

Carruurta oo dhan ka bilow 6 ilaa 15 sanno jir ah ee ku nool Austria waa in ay dugsiga aadaan, tusaale. **ka qeybgalka dugsiga waa qasabKa**. Tani sidoo kale waxay quseysaa carruurta magangalya doonka ah iyo qaxootiga.

Ka qeybgalka dugsiyada ay maamulaan gobolka waa bilaash. Waxaa sidoo kale jira dugsiyo gaar ah, laakin qidmooyinka qarashkaan.

Waa in aad ka diiwaangelisaa caungaaga dugsiga deegaankaaga. Adiga iyo canugaaga waa in aad ka qeybgashaan  diiwaangelinta dugsiga nidaamka iyo wado turjubaan haddii aadan weli si wanaagsan ugu hadlin af Jarmal. Warqad martiqaad ah oo ka socoto maamulka waxbarashada gobolka/ maamulka waxbarashada magaalada Vienna ayaa kuu sharxi doona goorta nidaamka diiwaangelinta dugsiga uu dhici doono iyo dokumentiyada aad la tegi doonto

Canugaaga waxaa la siinayaa jadwal waqti kaas oo muujiyo saxda inta dheer ee casharka socdo maalin walba. Haddii canugaaga uu jirinyahay, waa in aad soo ogeysiisaa dugsiga. Waa in aad imaadid habeenkii waalidiinta –adigoo wato turjumaan, haddii aad rabto. Waxaa dhacdooyinkaan lagugu siin doonaa warbixin muhiim ah!

Dhammaan ardayda waxaa la siiyaa wargelinada dugsiga dhammaadka muddo walba iyo shahaadada dhammaadka

sannadka dugsiga.. Guulaha arday walba waxaa la buundeeyaa buundooyinka ka bilaabanayo 1 ilaa 5. 1 waa buundada ugu wanaagsan, 5 waa buundada ugu xun. Carruurta oo aan weli si wanaagsan ugu hadlin af Jarmalka lama buundeeyo. Inta badan Dugsiyada hoose ma bixiyaan darajooyin laakiin waxay erayo ahaan u sharaxaan horumarka waxbarashada carruurta.

## 2 Yaa ku caawinaya canugeyga in uu barto af Jarmalka?

Canugaaga waxaa lagu meeleynayaa fasal ku haboon da'diisa ama da'deeda. Carruurta ku hadlo luuqada hooyo kala duwan si wadadjir ah ayaa loo baraa.

Carruurta da'da dusiga ee ku hadla in yar ama aan kuba hadlin af Jarmalka waa laga ogolyahay dugsiga sida loo yaqaan **ardayda aan joogtada aheyn**. Waxaa la siiyaa labo sanno oo lagu helayo cilmi muhiim ah aqoon aasaas ee luuqada Jarmalka. Ma la buundeynayo inta lagu jiro mudadaan, laakin waxay sikastaba ahaatee ka faa'idayaan heerka dugsiga xiga.

Ardayda aan joogtada aheyn ayaa ka qeybqaadan karo waxa loo yaqaan **koorsada taageerada luuqada**. ka dibna waxay qaadanayaan casharo Jarmal ah oo xoogan- amaba kooxo yar yar ama macalin labaad oo fasalka ah.

Dugsiyo badan sidoo kale waxay ku bixiyaan **casharo luuqada hooyo ee ardayda**. Waa in aad u diiwaangelisaa caungaaga kuwaan. Casharada badanaa waxay ka dhacaan labo cashar galabtii ah. Weydii haddii dugsiga canugaaga ama dugsiga u dhow uu ku bixiyo casharo luuqadiisa ama luuqadeeda hooyo.

## 3 Ma in aan iibsanaa buugaagteena gaarka ah ee dugsiga?

Maya, sababtoo ah ardayda hesho buuggaagta dugsiga oo bilaash ah ee maadooyinka oo dhan ah sida qeyb ka ah ololaha buuga dugsiga. Carruurta labada luuqad ku hadasha waxay sidoo kale heli karaan buuggaagta Jarmalka sida luuqada labaad sidoo kale sida qamuuska labada luuqad. Haddii canugaaga ugu qeybqaato casharada luuqadiisa ama luuqadeeda, isaga ama iyada waxay sidoo kale helayaan buug dugsiga dhigma.

## 4 Dugsigee ayuu canugeyga ka qeybgalayaa?

### Carruurta da'da dugsiga

**Dugsiga hoose (VS)**
**6 ilaa 10 sanno da'da ah**
**1Aad ilaa 4aad sannad dugsiyeedka**

Carruurta ka bilaabaneyso 6 ilaa 10 sanno da'da ah waxay aadaan Dugsiga Hoose 4 sanno. Haddii canuga lix-sanno jir ah uusan weli diyaar u aheyn in uu bilaabo aadista dugsiga, isaga ama iyada waxaa laga ogolaanayaa heerka dugsiga hore. Isaga ama iyada ka dib waxay qabaan sannad dheeraad ah oo lagu helayo isticmaalka sharuudaha dugsiga.

**Dugsiga Dhexe ee Cusub (NMS)**
**Dugsiga Guud Waxbarashada Sareyso (AHS) - Heerka Hoose**
**10 ilaa 14 sanno da'da ah**

Dugsiga Hoose ka dib, carruurta waxay aadaan NMS ama heerka hooseeyo ee AHS ee 4 sanno. Carruurta imaato Austria da'dooda ah 10 sanno ama ka weyn waxaa isla markiiba laga ogolaanayaa NMW ama heerka hooseeyo ee AHS sida waafaqsan da'dooda.

NMS waa in ay ogolaataa ardayda oo dhan, laakin AHS ayaa leh xaqa lagu diidayo codsadaha.

Ardayda si guul ah u buuxiyo NMS ama heerka hoose ee AHS 4 sanno kadib waxay joogteyn karaan waxbarashada dugsigooda ee dugsiga hoose ama dhexe ee hormarsan.

**Dugsiga Xirfadaha (PTS)**
**14 ilaa 15 sanno da'da ah**
**9aad sannadka dugsiga**

Ardayda oo aan ka qeybgalin dugsiga hormarsan waxay buuxinayaan waxbarashadooda qasabka ah ee PTS ama hal-sanno dugsiga saayniska qoyska. Sannad dugsiyeedkaan qasabka ah ee ugu dambeeyo, ardayda waxay u diyaarsamayaan shaqada nolosha.

**Waxbarashada Gaarka**
**6 ilaa 15 sanno da'da ah**
**1aad ilaa 9aad sannadka dugsiga**

Tixgelinta waa qaadashada carruurta da'da dugsiga iyo **baahida waxbarashada gaarka ah** (tusaale.carruurta camoolaha ama dhaqoolaha). Waxay ka qeybgali karaan dugsi gaar ah ama waxay ku xirantahay da'dooda - Dugsiga Hoose, Dugsiga Dhexe ee Cusub (NMS), heerka hooseeya ee Dugsiga Waxbarashada Guud ahaan Sareyso (AHS), ama Dugsiga Xirfada, ama halka-sanno ee Dugsiga Saayniska Qoyska.

Dooqyada xiga waxaa la heli karaa markii dugsiyeynta qasabka ah:

**Dugsiga Shaqada**
**Ka bilow 15 sanno da'da ah**

Markaad dhameystirto kadib waxbarashada qasabka ah (9 sanno), dadka dhalinyarada ah waxay mari karaan tababarka shaqada. Waa in ay helaan shirkad u magacaabeyso sida arday iyo sidoo kale ka qeybgala Dugsiga Shaqada isla markaas. Tani waxay soconeysaa dhab ahaantii haddiiba tababarka (2 ilaa 4 sanno ah). Dugsiga Shaqada, xirfada wax ku oolka ah ee laga helo shirkada waxaa lagu kabay aragtida cilmiga. Imtixaanka tababarka ugu dambeyso wuxuu xaq siiyaa shaqsiga ku dhaqmo xirfada la bartay. Austria, waxaa jio ku dhawaadkii 200 oo tababaro kala duwan.

Dhalinyarada magangalya doonka waxay qaadan karaan ilaa tababarka kaliya ee loo yaqaan **shaqada aan badneyn**. Kuwaan waa shaqooyinka ee shaqaalaha degdega loogu baahanyahay.

## Dugsiyada Hormarsan

Dugsiyada hormarsan ma loo baahno in ay ogolaadaan codsadayaasha. Agaasimaha dugsiga wuxuu qaadaa go'aamada oo dhan ee ogolaanshaha. Sidaas darteed inta badan uma fududo dadka yar ee aan markale waajib ku aheyn in ay sii wataan waxbarashadooda ee ka baxsan wadankooda asalka ah, gaar ahaan haddii aysan weli usuurtogaleynin in ay ku hadlaan af Jarmal. Mabaadi; ahaan, sikastaba, waa suurtogal in laga ogolaado dugsiyada hormarsan sida ardayda aan joogtada aheyn. Haddii aad ka haysatid shahaadooyin wadankaaga asalka, fadlan la imaw kuwaan marka aad is diiwaangelineysid.

## Dugsiga Guud Waxbarashada Sareyso (AHS) - Heerka Sareeyo
**14 ilaa 18 sanno da'da ah**

Kadib NMS ama heerka hooseeya ee AHS, dhalinyarada waxay joogteyn karaan waxbarashada dugsiga ee heerka kore ee AHS. AHS wuxuu bixiyaa waxbarasho guud ahaan wanaagsan. Waxay socotaa 4 sanno iyo waxay ku dhammaataa dugsiga Austrian-ka tagida imtixaanka (Matura). Matura waxay xaq u leedahay haystaha in uu dhigto jaamacadaha, kulliyadaha farsamada ama kulliyadaha tababarka macalinka.

## Dugsiyada Shaqada

Waxaa jiro noocyo kala duwan ee dugsi ahganacsiga, farsamada, dalxiiska, bulshada iyo goobaha kale.

## Dugsiyada Sare ee Shaqada (BMS)
**14 ilaa 17 (18) sanno da'da**

Dugsiyada Sare ee Shaqada (ama kulliyadaha farsamada) waxay bixiyaan shahaadooyin shaqo iyo waxbarashada guud. Waxay soconeysaa 3 ama 4 sannooyin iyo waxay dhammaataa imtixaanka ugu dambeeyo. Taas kadib, waa suurtogal in lagalo shaqada nolosha ama u diyaar garowga shaqsiga koorso hormarsan ee lagu buuxiyo koorso barashada ee Dugsiga Sare ee Shaqada.

## Dugsiga Sare ee Shaqada (BHS)
## 14 ilaa 19 sanno da’da ah

Dugsiyada Sare ee Shaqada wuxuu bixiyaa waxbarsho sareyso oo shaqada ah iyo waxbarashada guud ee adag. Waxay soconeysaa 5 sanno iyo waxay dhamaaneysaa ka tagida dugsiga iyo imtixaanka diploomada. Imtixaankaan wuxuu xaq u leeyahay haystaha in uu dhigto jaamacadaha, kulliyadaha farsamada ama kulliyadaha tababarka macalinka.

**Erhältlich unter www.schulpsychologie.at/bildungsinformation auch in folgenden Sprachen:**

Albanisch
Arabisch
Bulgarisch
Deutsch
Englisch
Farsi
Französisch
Rumänisch
Russisch
Tschetschenisch
Türkisch

**Ogeysiin sharci ah**
Mulkiilaha warbaahinta, soo-saaraha iyo tafa-tiraha:
Wasaarada Waxbarashada Federaalka
1010 Vienna
Telefoon: +43 1 531 20-0
www.bmbf.gv.at
Naqshadaynta: BKA Design & Grafik
Daabacay: One2print / DI Hans A. Gruber KG
Vienna, 2016/17
Dabacaada 2aad